

Su'aalaha iyo Jawaabaha ku taxluqa MTAS ee Aqrinta, Xisaabta, iyo Sayniska

Waa maxay MTAS?

Intixaamka Xirfadaha Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Test of Academic Skills - MTAS) waa qiimayn ku salaysan heeraarka horumarka duwan ee ardada qaba naafonimada fahmada ee ba'an. Waxa ay qayb ka tahay barnaamijka qiimaynta ee Minnesota.

MTAS waxa lagu cabbirayaa xirfadaha akhriska, xisaabta iyo sayniska ee la xariira manhajka waxbarashada guud. Xirfadahaan waxa ay muujinayaan fillitaannada sare ee ardada qaba naafonimada fahmada ee ba'aan, balse hawlaha lagu cabbirayo xirfadahaan ay yihiin kuwo aad uga dhib yar kuwa ku jira Baahida Qiimaynta Cilmiyeed ee Minnesota.

Waa maxay ujeeddada ka dambaysa MTAS?

MTAS waa mid ka mid ah intixaamada dugsiyada federaalka ay u isticmaasho in lagu buuxiyo federaalka iyo sharuudaha sharciga gobolka ee ay dhici karto in lagu qaado booska MCA.

Dugsiyada ayaa masuul ka ah in ay qanciyaan baahida waxbarashada ardada oo idil. Ardada qaarkood ma ay gaari karaan heerka fahmada ee darajada ku habboon sababo la xariira naafonimadooda, MTAS waxa ay ka caawinaysaa in la xaqiijiyo in dugsiyada ay bixiyaan helitaanka waxbarashada u jeedda aqrinta, xisaabta, iyo sayniska ee ku xiran Heerarka Waxbarashada Minnesota ee heerka ardayga darajadiisa illaa heerka ku habboon.

Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiyadeed ee canuggaaga (Educational Program - IEP) wuxuu tilmaami karaa baahida waxbaridda qaaska ah ee xirfadaha fahmada iyo waxbarashada. MTAS waxaa loo naqshadeeyay in ay xisaabiso hormarka ardayga ee xirfadaha waxbarashada.

Yaa laga rabaa in uu intixaanka galo?

Ardada oo idil ee dugsiyada guud dhigta waxaa laga rabaa in ay ka qaybqaataan barnaamijka qiimaynta gobolka oo idil. Intixaamada waxaa laga qaadayaa darajooyin qaas ah ee akhriska (3–8 iyo 10), xisaabta (3–8 iyo 11) iyo sayniska (5, 8, iyo hal mar dugsiya sare).

MTAS waxa ay ku habbonaan kartaa ardada qaarkood ee haysta IEP ee qaba naafonimada fahmada ee ugu ba'an. Ardada waxay qaadan kartaan MTAS ee akhriska, xisaabta iyo/ama sayniska ee galaya booska MCA. Kooxda IEP ayaa masuul ka ah in ay go'aamiyaan sida u ardayga uga qaybqaadanyo intixaamidda gobolka oo idil.

Shuruudaha U-Qallmida MTAS (MTAS Eligibility Requirements) waxay ku caawisaa kooxda IEP si loo ogaado cidda qaadi doonta MTAS. [Ka eeg Shuruudaha U-Qallmida MTAS shabakadda internetka MDE wixii macluumaad gaara.](#) (Gal qeybta Districts, Schools and Educators > Statewide Testing > Minnesota Tests.)

Waa maxay waxa la iska rabo si intixaanka looga gudbo?

Ardada ma gudbayaan ama kuma dhacayaan MTAS, loomana isticmaali doono si lagu go'aamiyo haddii canuggaaga uu ugu gudbi karo darajada xigta. Arday kasta waxa uu helayaa buundo galaysa mid ka mid ah affarta heer ee horumarka cabbiraya—Ma Buuxin Heerarka Duwan ee Guusha Kale, Qeybahaan Buuxiyay Heerarka Duwan ee Guusha, Buuxiyay Heerarka Duwan ee Guusha, iyo Dhaafay Heerarka Duwan ee Guusha Kale.

Waa maxay qaabka uu yahay intixaamka?

MTAS waa qiimaynta waxqabadka ee uu bixinayo ardayga barihiisa (ama shaqaale kale ee dugsi degmada) qaab baraha iyo ardayga keliya. Hawlaha waxqabadka waa kuwa waxbarashda qura la xariira waxaana lagu cabbirayaa canuggaga xirfadihiisa ku aaddan akhriska, xisaabta iyo sayniska. Hawlaha lagaga shaqaynayo MTAS waxay si weyn uga dhib yartahay su'aalaha intixaamka MCA. Hawlaha waxa dhici karta in kor loogu akhriyo ama lagu metelo sawirro iyo/ama sheeyo uga dhigayo in ay helaan ardayda u baahan taageero noocaas ah. Ardada waxaay ku jawaabi karaan siyaabooyin kala duwan (sida hadal ahaan, tilmaahaan ahaan iyo isha la raacid ahaan) si ay ku muujiyaan waxa ay ka yaqaanaan hawlaha horyaalla.

Waa maxay xirfadaha lagu cabbirayo MTAS?

Intixaanka MTAS waa qeexitaanka akhriska, xisaabta iyo sayniska ee lagu bixinayo macluumaad qaas ah ku taxluqa ee lagu qiimaynayo MTAS. [Ka eeg qeexintaannada intixaanka shabakadda intarneetka ee MDE.](#) (Gal qaybta Districts, Schools and Educators > Statewide Testing > Test Specifications.)

Sheeyada tusaalayaasha ku caawiya ardayda in ay ku bartaan qaabka intixaanka nuucyada su'aalaha ee intixaamka ku jira. [Gal qeybta bogga tusaalooyinka sheyga ee websaydka MDE wixii warbixin ah ee gelitaanka tusaalooyinka sheyga iyo casharada ardayga.](#) (Gal qeybta Districts, Schools and Educators > Statewide Testing > Item Samplers.)

Akhriska

Akhriska MTAS waxaa ku jira hawlaha wax-soo-saarka ee cabbiraya ardayga fahmadiisa sheekooyinka mala'awaalka ee gaagaaban iyo kuwa aan mala'awaalka ahayn. Sadarrada iyo hawlaha waxa dhici karta in ay la socdaan sawirro, astaamo iyo/ama sheeyo. Ardada qaadanaaya Akhriska MTA waxa ay dhegaysan karaan sadarro, la akhristaan sadarro baraha sadarrada u akhristaan iskood.

Xisaabta

Xisaabta MTAS waxaa ku jira hawlaha wax-soo-saarka cabbiraya ardayga fahmadiisa xirfadaha xisaabinta iyo garaadka xisaabeed. Hawlaha waxaa lagu taageeri karaa xarriqmaha sawir gacmeedyo, sawirro iyo/ama sheey (sida qaabab) kuwaaso ardayga ku caawinaya in uu ku fahmo waxa asaga ama ayada la weydiinayo in ay sameeyaan.

Sayniska

Sayniska MTAS waxaa ku jira hawlaha wax-soo-saarka cabbiraya ardayga fahmadiisa fikradaha sayniskaiyo nidaamyada. Hawlaha wax-soo-saarka waxaa lagu taageeri karaa sawir gameedyo, sawirro iyo ama sheeyo (sida aalado) kuwaaso ardayga ku caawinaya waxa asaga ama ayada la weydiinayo in ay sameeyaan.

Sidee ku arki karaa natiijooyinka MTAS ee canuggayga, iyo dugsiga degmadayda?

Degmadaadu waxa ay heli doontaa warbixinta shaqasiyadeed ee canug kasta ee qaatay MTAS waxayna macluumaadkaan u direysaa waalidka iyo ilaaliyeyaasha. Warbixintaan waxa ay muujinaysaa buundooyinka canugaaga ee aagaga xirfadaha gaarka ah ee maaddo walba iyo buundeynta guud ee maaddo walbo, iyo waxay tusaysaa heerarka horumarka ee canuggaaga ee MTAS. Dugsigu waxaa dhici karta in uu macluumaadkaan uu u isticmaalo si lagu qiimeeyo waxqabadka waxbaridda, iyo kooxda IEP waxa ay dooran karaan in macluumaadkaan u isticmaalaan hal cabbiraad ee horumarka waxbarashda.

Natiijooyinka dugsiga iyo degmada waxaa la dhigay Kaarka Warbixinta ee Minnesota qeybta Data Center ee shabakadda internetka MDE. [Gal qeybta Warbixinta Bajeellaha ee Minnesota ee ku yallaa shabakadda internetka ee MDE.](#) (Gal qaybta Data Center > Minnesota Report Card.)

Wixii macluumaad dheeraad ah, la soo xariir:

Statewide Testing
mde.testing@state.mn.us

Minnesota Department of Education
1500 Highway 36 West
Roseville, MN 55113-4266
<http://education.state.mn.us>

Siibteembar 2016